# Shatiga Darawalnimada/Kaarka Aqoonsiga/Ogolaanshaha Barista ee La Xoojiyey

*FADLAN SI MUUQATA UGU QOR KHAD MADOW AMA BULUUG AH ADIGA OO ISTICMAALAYA XARFAHA WAAWEYN DHAMMAANTEED*

## Nooca Arjiga

***Shatiga ama kaarka aqoonsiga ee noocee ah ayaad rabtaa inaad codsato?***

☐ Shatiga ama kaarka aqoonsiga ee caadiga ah

☐ Shatiga darawalnimada ama Kaarka aqoonsiga ee u hogaansamaya REAL ID (dokumentiyo dheeri ah ayaa loo baahanyahay)

☐ Shatiga Baabuur Wadista ama Kaarka Aqoonsiga ee la Xoojiyey (EDL/EID) (dukumentiyo dheeraad ah ayaa loo baahanyahay)

| | Caadiga ah | Aqoonsiga dhabta ah (Real ID) | La xoojiyey |
|---|---|---|---|
| Waxaa loo isticmaali karaa safarka duulista hawada ee gudaha wadanka | Ilaa Maajo 7, 2025 | ☑ | ☑ |
| Waxaa loo isticmaali karaa in lagu galo xarumaha federaalka sida saldhig milatariga ama warshada tamarta nukliyeerka | | ☑ | ☑ |
| Waxaa loo isticmaali karaa ahaanshaha dukumeentiga kaga gudubitaanka xadka Maraykanka (dhulka iyo badda kaliya) | | | ☑ |

**Lambarka Shatiga Darawalnimada Minnesota, Ogolaanshaha Barista ama Kaarka Aqoonsiga** ___ ________-________-________-________

**Taariikhda Dhalashada** (Bisha/Maalinta/Sannadka) ___ ___/___ ___/___ ___ ___ ___

**Magacaaga Sharciga ah**

Magaca Hore oo Dhamaystiran ______ Magaca Dhexe oo Dhamaystiran ______ Magaca Dambe oo Dhamaystiran ______

**Magacagii hore ee sharciga ahaa (kaliya waxa uu ku khuseeyaa haddii aad bedeshay laga soo bilaabo markii aad qaadatay shatiga darawalnimada, aqoonsiga ama ogolaanshaha barista)**

Magaca Hore oo Dhamaystiran ______ Magaca Dhexe oo Dhamaystiran ______ Magaca Dambe oo Dhamaystiran ______

**Ciwaanka Deganaanshaha (meesha aad ku nooshahay) Ma aha sanduuqa PO Box (aan ka aahayn Safe At Home). Xasuusin: Hubi in kani yahay ciwaankaaga hadda oo sax ah. Xafiiska boostadu cinwaan kale uma soo gudbin doono kaadhkaaga.**

Lambarka ______ Magaca Waddada ______ Lambar Abaartimentiga# ______

Magaalada ______ Gobolka ______ Zip Code ______

**Ciwaanka Boostada Ikhtiyaariga ah Hubi in kani uu yahay ciwaan sax ah. Xafiiska boostadu cinwaan kale uma soo gudbin doono kaarkaaga.**

Waxaan caddaynayaa in Adeega Boostada U.S.Postal Service uuna iigu keeni doonin boostada Ciwaanka Deganaanshahayga ee kor ku qoran. XARFAHA MAGACAAGA SOO GAABI____________.

Fadlan halkan calaamadi haddii kani yahay cinwaan boosto joogto ah ama hal mar ah ☐ Cinwaanka Boostada Joogto ah ☐ Cinwaanka Boostada Hal mar ah

Lambarka ______ Magaca Waddada ______ Lambar Abaartimentiga# ______

Magaalada ______ Gobolka ______ Zip Code ______

**Sharaxaada Jireed ee Codsadaha**

| Midabka Indhaha | Dhererka (Fiit / Inji) | Miisaanka rodol ah | Lab | Dheddig | Jinsi Lahayn |
|---|---|---|---|---|---|
| ☐☐☐ | ☐ Fiit ☐☐ Inji | ☐☐☐ | ☐ | ☐ | ☐ |

| Loogu talagalay in xafiisku isticmaalo keliya | ☐☐☐☐☐☐☐☐☐ | ☐ **Waxaan caddaynayaa inaanan haysan lambarka sooshal sakuuratiga.** |
|---|---|---|

☐ **DIIWAANGELINTA HADYADAYNTA:** Waxaan rabaa shatigayga ama kaarka aqoonsiga inuu muujiyo inaan doortay inaan noqdo ku deeqe xubin iyo unug sida uu qabo XEERKA HADIYADAYNTA XUBNAHA (2007).

☐ **Wax ku tabarycid:** Waxaan rabaa inaan **ku tabaruco $2** si aan u taageero waxbarashada ku deeqidda xubnaha iyo unugyada.

**Si aad meesha uga saarto muujinta ku deeqida xubnaha oo hadda kuu qoran, ku qor halkan REMOVE (KA SAAR):______________________**

**Dhammaan codsadayaashu waa inay ka jawaabaan kelmadahan:** (fadlan goobaab jawaabtaada)

1. HAA MAYA Waxaan codsanayaa in shatigayga ama kaarka aqoonsigaygu uu muujiyo inaan haysto dardaaran nololeed ama dardaaran daryeel caafimaad.
2. HAA MAYA Waxaan codsanayaa in shatigayga ama kaarkayga aqoonsigu uu muujiyo aqoonsiga Digniin Caafimaad (Medical Alert). Waxaan fahamsanahay in kaarku uusan caddayn doonin wax macluumaad caafimaad ah, iyo inaan wadan doono macluumaadka lagama maarmaanka ah.
3. HAA MAYA Miyaad ka haysatay shatiga darawalnimada ama ogolaanshaha barista meel kale oo aan ahayn Minnesota tobankii (10) sano ee la soo dhaafay? Haddii ay HAA tahay, halkee? ______________________

**DHAMMAAN codsadayaasha shatiga darawalnimada iyo ogolaanshaha barista:** (fadlan goobaab jawaabtaada)

4. HAA MAYA Miyaad qabtaa xaalad caafimaad oo kale oo sababi karta luminta miyir-qabka ama ismaamulka ikhtiyaariga ah? Haddii ay haa tahay, sharax::______________________
5. HAA MAYA Miyaad qabtaa xaalad caafimaad oo kale oo wax u dhimi karta hawlgalka badbaadada baabuur wadista? Haddii ay haa tahay, sharax:______________________
6. HAA MAYA Ma rabtaa inaad ku darto muujinta in aad tahay HOWLGABKA CIIDAMADA shatiga ama kaarka aqoonsiga? (Caddayn ayaa loo baahanyahay)

**Darawalada shatiga ku meel gaarka ah, KALIYA**: (fadlan goobaab jawaabtaada)

7. HAA MAYA Ma haysaa wax xukun ah oo ku saabsan khamriga, waxyaabaha la xakameeyey, ama xadgudubyada socodka oo ku jira diiwaankaaga baabuur wadista?

**Darawalada shatiga ganacsiga (CDL), KALIYA**: (fadlan goobaab jawaabtaada)

8. HAA MAYA Miyay mudnaantaada darawalnimada lagu diiday xeerka 49 CFR 383.51 ama sharci kasta oo kale oo Gobolka Minnesota ah?

Fadlan la hadal wakiilka si aad u hesho foomamka dheeraadka ah ee loo baahan yahay haddii aad rabto inaad ku darto xiriir(xiriiro) xaaladaha degdega ah ama **macluumaadka daryeelaha** diiwaanka elegtarooniga ah ee DVS iyo/ama haddii aad rabto inaad ku darto muujiyaha Ootiisamka/Caafimaadka Dhimirka aqoonsigaaga.

Haddii codsaduhu ka yar yahay 18 sano oo uu codsanayo magacaabista ku-deeqaha xubnaha iyo/ama mudnaanta wadista, waan ogolaaday codsiga. Haddii aan codsanayo shatiga darawalnimada ku meelgaarka ah, waxaan caddaynayaa in codsaduhu uu baabuur ku kaxeeyay kormeerka darawal shati leh ugu yaraan illaa uu gaarayey 21 sano jir wax aan ka yarayn 50 saacadood (40 saacadood oo wata caddaynta dhamaystirka fasalka ee waalidka ee dheeriga ah). Haddii aan codsanayo shatiga darawalnimada ee qof ka yar 21, waxaan cadaynayaa in 10 saacadood oo wadista la kormarayo uu la sameeyey darawal shati leh ugu yaraan 21 sano.

______________________

**X Saxeexa Waalidka/Mas'uulka Sharciga ah ee Maxkamad Magacawday** **Xiriirka waxa ay isu yihiin Codsadaha**

**Igu hor saxiixay oo aan dhaariyey ______________, maalinta ______________________ .**

**Ruqsada Diiwaankaygu wuxuu dhacayaa _____/______/______**

______________________

**X (Saxiixa Nootaayada Dadwaynaha)**

(Shaabada)

**KAARKA DIIWAANGELIN COD-BIXIYE:** Ma tahay muwaadin Maraykan ah? ____HAA ____MAYA

Miyaad 18 jir noqon doontaa maalinta doorashada soo socota ama kahor? ____HAA ____MAYA

Waxaan codsanayaa in la i diwaangeliyo si aan u codeeyo (kaliya haddii aanan hore isu diwaangelin si aan u codeeyo, oo uu ku qaranyahay ciwaanka sare). Hoos ka eeg macluumaadka u qalmitaanka

**Hoos ka akhri bayaanka oo saxeex kaliya haddii ay dhammaan qaybuhu ku khuseeyaan.**

Waxaan cadeynayaa inaan:

- ahay ugu yaraan 16 jir oo fahmay in aan ahay ugu yaraan 18 jir si aan ugu qalmo codbixinta;
- In aan ahay muwaadin Maraykan ah
- in aan haystay deganaanshaha Minnesota 20 maalmood kahor maalinta doorashada;
- In aan deganahay ciwaanka ku qoran foomka diiwaangelinta;
- In aanan ku jirin ilaalin ay maxkamadu amartay taas oo maxkamadu uu igala noqday xaqa aan u leeyahay in aan codeeyo;
- in ayna maxkamad igu helin inaan sharci ahaan karti u lahayn inaan codeeyo;
- in aana hadda u xirnayn xukun dembi culus; iyo
- in aan akhriyay oo aan fahmay bayaankan, in bixinta xog been abuur ah ay tahay dembi la isku ciqaabi karo wax aan ka badnayn shan (5) sano oo xadhig ah ama ganaax aan ka badnayn $10,000, ama labadaba.

______________________________________________

**Taleefanka iyo/ama email-ka** **Degmada Iskuulka (haddii aad garanayso)**

## Waaxda Badbaadada Dadweynaha ee Minnesota Arjiga shatiga/kaarka aqoonsiga darawalnimada

# Ogeysiiska Tennessen

## MUHIIM: AKHRISO OGAYSIISKAN INTAADAN BUUXIN ARJIGAN OGAYSIIS

**Maxaa lagu weydiinayaa inaad wadaagto macluumaadkan sidee ayaase loo isticmaali doonaa?**
Waaxda Badbaadada Dadweynuhu (DPS) waxay u isticmaali doontaa macluumaadka si ay kuu aqoonsato inaad tahay qof, si ay u aqoonsato diiwaankaaga darawalnimada, si ay u go'aamiso u qalmitaankaaga shatiga darawalnimada, shatiga ama kaarka aqoonsiga, ka hortaga khiyaanada, si ay u gasho diiwaankaaga adeeg kasta oo mustaqbalka ah, howlfulinta iyo/ama weydiimaha, iyo in loo hogaansamo sharciyada gobolka iyo federaalka.

**Sharciyada gobolka iyo federaalka ayaa waxay u baahanyihiin ururinta macluumaadkan.**
Xeerarka Minnesota §§ 171.06, 221.031, iyo 221.0314, iyo xeerarka badbaadada gaadiidka ee dawlada federaalka (49 CFR) §§ 383.71 iyo 383.153) ayaa waxay u baahan yihiin ururinta macluumaadkan.

**Cawaaqibta ka dhalan karta bixinta ama diidmada inaad bixiso macluumaadka.**
Haddii aad keento macluumaadka la codsaday, DPS waxay awood u yeelan doontaa inay go'aamiso inay ku siiso ogolaanshaha barista darawalnimada, shatiga, ama kaarka aqoonsiga. Macluumaadka waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan gobolo kale si ay go'aan uga gaaraan haddii ay ku siinayaan liisanka darawalnimada, ogolaanshaha wadista, ama kaarka aqoonsiga. Macluumaadka la codsaday waxa kale oo loo isticmaali karaa bixiyayaasha caymiska si loo go'aamiyo u qalmitaanka caymiska baabuurta.

Haddii aadan bixinin macluumaadka la codsaday, DPS kuma siin karto ogolaanshaha wadista, shatiga, ama kaarka aqoonsiga, iyo mudnaantaada gaari wadista, haddii ay jirto, ayaa laga yaabaa in ay saamayso.

**Sidee ayaa xogta la codsaday loola wadaagayaa ha'ado kale?**
DPS waxay xogtan u sii deysaa hay'adaha dawlada hoose, gobolka, iyo dawlada dhexe kaliya sida uu u ogolyahay ama uu farayo sharciga gobolka iyo sharciga dawlada dhexe. Tan macneheedu waa in macluumaadka lala wadaagi karo kuwa soo socda:

| | |
|---|---|
| Maamulka Sooshal Sakuuratiga | Waaxda Ganacsiga ee MN |
| Nidaamka Adeegga Xulashada (Selective Service) | Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee MN |
| Waaxda Shaqada ee Federaalka | Xafiiska Xoghayaha Dawladda ee MN |
| Waaxda Adeegyada Aadanaha ee MN | Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah ee MN |
| Waaxda Dakhliga ee MN | Waaxda Arrimaha Howlgabka Ciidamada ee MN |

Intaa waxaa dheer, macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed waxaa laga yaabaa in loo shaaciyo sida uu ogolyahay Sharciga Maraykanka, cinwaanka 18, qaybta 2721.

**Xasuusin ku saabsan lambarkaaga Sooshal Sakuuratiga.**
Waa inaad bixiso lambarkaaga Sooshal Sakuuritiga sida uu qabo MS § 171.06 iyo sharciga Sooshal Sakuuritiga, 42 USC § 666(a) (13). Lambarkaaga sooshal sakuuratiga ayaa sidoo kale loo baahan yahay si loo go'aamiyo u qalmitaankaaga shatiga darawalnimada ganacsiga sida ay qabaan shuruucda badbaadada gaadiidka xamuulka ee federaalka, 49 CFR § 383.153. Waxa loo isticmaalaa in lagu maamulo barnaamijyada fulinta masruufka caruurta iyo in la soo helo shakhsiyaad si loo xaqiiqjiyo aabbanimada. Waxa kale oo loo isticmaalaa in laga xaqiijiyo aqoonsigaaga iyo ciwaanka aad degan tahay Maamulka Sooshal Sakuuritiga, Waaxda Dakhliga ee Minnesota, Adeega Dakhliga Gudaha, Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah ee Minnesota; iyo Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

## ISTICMAALKA LA OGOLYAHAY EE MACLUUMAADKA BAABUURTA SIDA LAGU BIXIYEY XEERKA MARAYKANKA, CUTUBKA 18, QAYBTA 2721

- Isticmaalka hay'ad kasta oo dawladeed, oo ay ku jirto maxkamad kasta ama wakaalad kasta oo sharci fulinta ah, marka ay gudanayso shaqadeeda, ama qof kasta oo gaar ah ama cid kasta oo ku adeegaysa magaca federaal, gobol, ama wakaalad maxali ah gudashada shaqadeeda.
- Isticmaalka la xiriira arrimaha baabuurka ama badbaadada darawalada iyo xatooyada; qiiqa baabuurta; wax ka beddelka qalabka baabuurka, dib u celinta cilladaha, ama la talinta; la socodka waxqabadka baabuurta, qaybaha baabuurta, iyo iibiyaasha; hawlaha daraasadaynta suuqa baabuurta, oo ay ku jiraan cilmi-baarista ra'yi ururinta; iyo ka saarida diiwaanada asalka ah ee mulkiilaha baabuurta dadka aan mulkiilaha lahayn .
- Si loogu isticmaalo habka caadiga ah ee ganacsiga ee ganacsiga sharciga ah ama wakiiladeeda, shaqaalaheeda, ama qandaraaslayaasheeda, laakiin kaliya:
  - (A) si loo xaqiijiyo saxnaanta macluumaadka shakhsiyeed ee uu shakhsigu u soo gudbiyo ganacsiga ama wakaaladeheeda, shaqaalaheeda, ama qandaraaslayaasheeda; iyo
  - (B) Haddii macluumaadka la soo gudbiyay aysan sax ahayn ama xilli dambe aysan sax ahayn, si loo helo macluumaad sax ah, laakiin kaliya ujeeddooyinka ka hortaga khiyaanada, dabagalka sixitaanka sharciga ah ee ka dhanka ah, ama dib u soo kasbashada deynta ama danaha amniga ee ka dhanka ah, shakhsiga.
- Isticmaalka la xiriira dacwad kasta oo madani ah, dembiyada, maamulka, ama garqaadida ee wakaalad kasta oo federaal ah, dawlad gobol, ama maxkamad maxalli ah ama wakaalad ama cid kasta oo hay'ad ismaamusha ah, oo ay ku jiraan adeega nidaamka, baaritaanka la filayo dacwad, iyo meelmarinta ama fulinta xukunnada iyo amarada, ama iyadoo la raacayo amarka ka soo baxay maxkamadda federaalka, gobolka, ama deegaanka.
- Si loogu isticmaalo hawlaha cilmi baarista, iyo isticmaalka soo saarista warbixinnada xisaabaadka tirakoobka, haddii aan macluumaadka shakhsiyeed aan la daabicin, dib loo shaacin, ama aan loo isticmaalin in lala xiriiro shakhsiyaadka.
- Isticmaalka caymis bixiyeyaasha ama ururka taageerada caymiska, ama hay'ad iskeed isu caymisa, ama wakiiladeeda, shaqaalaheeda, ama qandaraaslayaasheeda, ee la xiriira hawlaha baadhista sheegashooyinka, hawlaha ka hortaga khiyaanada, qiimaynta, ama caymiska gelinta.
- Si loogu isticmaalo siinta ogaysiinta mulkiilayaasha baabuurta la jiiday ama la xareeyey.
- Si loogu isticmaalo wakaalad kasta oo leh baaris gaar ah oo shati haysata ama adeega amniga shatiga u haysta ujeedo kasta oo lagu ogolyahay qaybhoosaadkan.
- Si ay u isticmaalaan loo shaqeeyaha ama wakiilkiisa ama caymiyaha si uu u helo ama u xaqiijiyo macluumaadka la xiriira haystaha shatiga darawalnimada ganacsiga ee looga baahan yahay Xeerka Badbaadada Baabuurta Ganacsiga, 49 USC §§ 31301-17.
- Isticmaalka la xiriira hawlgalinta adeegyada gaadiidka waddada kharashka ah (toll).
- Isticmaal kasta oo kale oo ka jawaabaya codsiyada diiwaanka baabuurka shakhsi ahaaneed haddii gobolku uu helay ogolaansho cad oo ka ymid qofka macluumaadka shakhsi ahaaneed khuseeyo.
- Qaybinta ra'yi ururinta, suuqgeynta, ama codsiyo wadar ah haddii gobolku uu helay ogolaansho cad oo ka ymid qofka macluumaadka shakhsi ahaaneed khuseeyo.
- Si loogu isticmaalo codsade kasta, haddii codsaduhu muujiyo inuu helay ogolaansho qoran ee shakhsiga ay xogtu khusayso.
- Isticmaal kasta oo kale oo si gaar ah loogu ogolaaday sharciga gobolka ee haysta diiwaanka, haddii isticmaalka noocaas ahi uu la xiriiro hawlgalka baabuur ama badbaadada dadweynaha.